



DIYAAR U NOQO HEERKULADA BARAFKA FADHIISTA IYO BARAF SOO DHACA



TAKE WINTER BY STORM

La soco saadaasha cimilada heerkulada barafka fadhiista iyo barafka soo dhaca. Tilmaamahani waxay kaa caawin karaan inaad is diyaarisid ka hor inta barafka uusan fadhiisanin iyo ka hor inta barafka uusan soo dhicin.

Personal Preparedness

- Isticmaal Qaboobaha uga Hortag Liiska Hubinta Barafka (Take Winter By Storm Checklist) si aad u diyaarsato agab gurmada, oo ay ku jirto raadiyo, toosh, beetariyo dheeraad ah, agabka gargaarka degdegga, macluumaadka xidhiidh gurmada, biyo, iyo cunto aan isbeddelin. Waxaad ka heli kartaa macluumaad faahfaahsan bogga internetka TakeWinterByStorm.org.
- Guriga, shaqada iyo gaadiidkaaga ku hayso dharka cimilada qabaw iyo bustayaal dheeraad ah si aad u isticmaasho gurmada si aad u yarayso hoos u dhaca kuleylka.
- Ka fogee kulayliyayaasha la qaadan karo farnijarka, daahyada iyo alaabada kale oo ololi og.

Dayactirka Guriga Cimilda Qabaw/Barafka

Ka hor inta qabawga bilaabmin...

- Adeegso waxyaabaha qabawga ka celiyo tubooyinka ku jira meelaha hoose iyo rakada gurigaaga. Tubooyinka bannaanka yaalaa waxay aad ugu nugul yihiin barafka. Xasuusnow – inta badan ee aad tubooyinka ka celisid qabawga, waa sida fiican ee aad u ilaaliso tubooyinkaada.
- Sharootada kuleylka ama fiilooyinka kuleylka la kantaroolo ayaa loo isticmaali karaa in lagu duubo tubooyinka. Hubso inaad isticmaasho alaabada ay ansixisay urur ka shaqeeyo tijaabinta oo madax bannaan, sida Underwriters Laboratories Inc., iyo isticmaalka loogu talagalay oo keliya (gudaha ama dibadda). Si dhaw ula soco dhammaan tilmaamaha gelinta iyo hawgalinta soo saareyaasha.
- Xidh meelaha biyuhu ka daadanayaan ee keenaya hawada qabaw inay soo gasho halka tubooyinka ku yaalaan. Raadi meelaha hawada ka baxdo agagaarka fiilooyinka korontada, daloolada qallajiyaha iyo tubooyinka. Isticmaal waxyaabaha lagu cubo ama waxyaabaha celiya qabawga si aad dibadda ugu celiso qabawga iyo si aad gudaha ugu haysidkuleylka. Qabawga daran, xiitaa dalool yar ayaa soo dayn kara hawo qabaw oo ku filan inay barafayso tubada.
- Wax ku duub beebabka iyo qasabadaha dibadda si aad uga ilaaliso barafka.
- Xidh tubooyinka beerta, iyo haddii la sameyn karo, ka xer gudaha uguna sii dayso biyaha tubooyinka ku xeran qasabadaha dibadda. Tani waxay dhimaysaa fursadda in biyaha fadhiistaan inta gaaban ay tubada mareyso guriga gudahiisa.

Marka meerkurigu hoos u dhaco...

- Dhibic biyo kulul iyo qabaw ayaa noqon kara inta ay qaadanayso inaad barafka ka ilaaliso tubooyinkaaga. Dhaaf biyaha diiran in ay tiftifaane habeenka oo dhan, waliba tubada marta darbiga dibadda.
- Fur alaabada kabadhada si aad ugu oggolaato kuleylka inuu gaaro tubooyinka aan laga daboolin qabawga ee hoosta ka mara meesha suxuunta lagu dhaqo iyo qalabka halka u dhaw darbiyada dibadda.
- Cusbo, dhalaaliyaha barafka, iyo/ama badiil ku nadiifi barafka yaala meelaha lagu socdo si dhaawac uusan uga dhicin hantidaada.
- Ka ilaali in barafku uusan ku badanin meelaha dumi kara.

Ka hor intaanad uga bixin gurigaaga socdaal...

- Kuleyliyaha gurigaaga yuusan ka hoos marin 55°F (12°C).
- Waydii saaxiib ama jaarka inay maalin kasta fiiriyaan gurigaaga si ay u hubiyaan inay diiran tahay si looga hortago barafawka.
- Xidh kaddibna dareeri siistemka biyaha. La soco in haddii gurigaaga leedahay siistemka firdhiyaha biyaha ee lagu damiyo dabka, in qalabkaasi uusan shaqeyn doonin marka aad xidho biyaha.

Marka lala kulmo heerkulada barafaw fadhiya iyo barafka soo dhaca, marka kowaad hubi ammaankaada. Kadibna hubi tan qoyska, asxaabta, iyo jaarka si aad u hubiso inay ROON yihiin.